Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio
Xogururinta Ra'yiga Dadwaynaha ee Qorshaha Gobolka ee 5 Sano

Hiigsiga Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio waa inuu abuuro isbaddal horumar ku sameeya madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo ku dhex jirka bulshada ee dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

Si uu tan u sameeyo, Golaha Naafooyinka Koboceed wuxuu aqoonsanayaa dhibaatooyinka ama baahiyaha ay tahay in la sheego. Dhibaatooyinkan ama baahiyahani waxa isku raaca xubnaha Golaha waxaana lagu sheegaa Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee ku saabsan Naafooyinka Koboceed. Qorshahan Gobolka waxa loo isticmaalaa in lagu abuuro qorshayaal deeqeed oo gaar ah.

Taariikhdu markay ahayd 2019, Golaha Naafooyinka Koboceed wuxuu qaaday tallaabadii koowaad ee hannaankan si uu u aqoonsado dhibaatooyinka iyo baahiyaha isagoo xog-ururin ka qaaday dadka adiga kula mid ah. Golaha Naafooyinka Koboceed wuxuu fiiriyey natiijooyinkii wuxuuna soo saaray qabyo-qoraalka Qorshaha Gobolka 5 Sano ee 2022-2026 ee kusaabsan Naafooyinka Koboceed.

Qabyo-qoraalka Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee 2022-2026 ee kusaabsan Naafooyinka Koboceed iyo guudmar waxa laga heli karaa websaytka golaha: http://ddc.ohio.gov

Hadda waxa la gaaray wakhtigii aanu ogaan lahayn aragtidaada ku aaddan qabyo-qoraalka adigoo buuxinaya Xog-ururinta Aragtida Dadwaynaha ee Qorshaha Gobolka ee 5 Sano. Waxa muhiim ah inaad fiiriso qabyo-qoraalka kahor inta aadan buuxin xogururintan.

Xogururintan, Golaha DD waxa loola jeedaa magaca dhammaystiran ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio, ooDD-na waxa loola jeedaa naafooyinka koboceed.

Ku waydiin mayno magacaaga ama macluumaad kale oo loo isticmaali karo in lagugu aqoonsado. Macluumaadkan waxa loo bixin doonaa qaab qarsoodi ah waxaana kaliya loo isticmaalayaa inuu gacan ka gaysto Golaha Naafooyinka Koboceed inuu soosaaro Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee xiga ee kusaabsan Naafooyinka Koboceed.

Haddii aadan garanayn sida looga jawaabo su'aal, dooro "Ma garanayo" ama ha ka jawaabin. Haddii jawaabta su'aali ayna meesha ku qornayn, fadlan dooro "Wax kale" oo jawaabta qor.

Qaybta 1: Kuma ayaad tahay?

1. Fadlan dooro qaybta sida ugu fiican uu sharraxaysa:

__ Qof leh Naafo ama Naftiisa-u-Doode
__ Waalid ama Xubin Qoys ama Masuul
__ Xirfadle Naafooyinka Koboceed ama Daneeye Kale
__ Wax kale: _____

2. Imisa jir ayaad tahay?

__ ka yar 14
__ 14-19
__ 20-34
__ 35-49
__ 50-65
__ Ka wayn 65

3. Waa maxay qoomiyadda isirka aad tahay?

__ Caddaan ama Kawkayshin (Caucasian)
__ Madow ama Afrikaanka Ameerikaanka ah
__ Hisbaanik ama Laatiino
__ Aasiyaan
__ Dhaladka Alaska/Hindida Mareykanka ah
__ Dhaladka Hawaii ama Baasifik Aaylaandar
__ Soomaali
__ Iska dhal laba ama ka badan oo qoomiyadood
__ Ma doonayo inaan ka jawaabo
__ Ma garanayo
__ Wax kale:
_____

4. Ma waxaad isku taqaan:

__ Lab
__ Dheddig
__ Nin Naageed
__ Naag nimeed
__ Jinsi kale oo gaar ah ama Dhinacna raacsanayn
__ Ma doonayo inaan ka jawaabo
__ Aan meesha ku qornayn (fadlan sheeg):_____

5. Waa maxay degmada aad Ohio kaga nooshahay?

_____

Kaliya ka jawaab #6 haddii aad dooratay Xirfadle Naafooyinka Koboceed ama Daneeye Kale #1

6. Kee ayaa sida ugu fiican kuu sharraxaya:

__ Bare
__ Dhakhtar
__ Kalkaaliso Caafimaad
__ Dhakhtarka ilkaha
__ PT/OT
__ Dabiibe Hadalka ah
__ Xirfadle Taageerada Tooska ah
__ Hage Shaqada ah
__ Shaqo Bixiye
__ Adeeg Bixiye Maalintii ah
__ Shaqaale Xarunta Nolosha Madaxabannaan
__ Shaqaale Gudiga Degmada
__ Xubin Gudiga Degmada
__ Shaqaale Hay'ad Gobol
__ Shaqaale Ka-howgale Xeerka DD
__ Guddoomiye Degmo (Commissioner)
__ Xubin Golaha Magaalada
__ Sharci-dejiye
__ Bixiye adeegga gaadiidka
__ Saaxiib
__ Ma doonayo inaan ka jawaabo
__ Wax kale: _____

Qaybta 2: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Carruurta iyo Caafimaadka

7. Adigoo niyadda ku haya Mashruuca **Isku Imaansho (Come Together)**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Isku Imaansho (Come Together):

Barnaamijyada u-doodista qoysku waxay siiyaan adeegyo muhiim ah shakhsiyaadka iyo qoysaska Ohio oo dhan. Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalinayaa mashruuc lagu abaabulayo laguna taageerayo ururrada u-doodista qoyska gobolka Ohio oo dhan. Mashruucani wuxuu:

- Sare u qaadayaa ururrada u-dooda qoyska inay wada shaqeeyaan.
- Kordhinta qaabab lagu xaqiijiyo in baahiyaha qoyska ay bulshadu dabooleen.
- Ku dhiirigalinta qoysaska heer deegaan inay u-doodaan in la hagaajiyo adeegyadooda iyo taageerooyinkooda.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

8. Adigoo niyadda ka haya mashruuca **Quwaynta Qoysaska** , darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Quwaynta Qoysaska (Empowering Families):

Muddada kulamada IEP, waalidiinta/qoysaska waxa ku adkaata inay aragtidooda dhiibtaan waayo baahida ayaa saa'id ah. Tan waxa keenaya kala duwanaanshaha awoodaha ee u dhexeeya waalidiinta/qoysaska iyo dugsiga. Iyadoo ay jirto taageero xaddidan oo ay helaan in ka badan 250,000 oo arday oo leh naafooyin Ohio, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalinayaa mashruuc si uu u kordhiyo una horumariyo:

- Taageerada waalidiinta/qoysasku ay helaan inta lagu jiro hannaanka waxbarashada gaarka ah.
- Aqoonta waalidiinta/qoysasku ay u leeyihiin hannaanka waxbarashada khaaska ah.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

9. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Madadaalada Cidna Aan Laga Tagayn (Inclusive Recreation)** , darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Madadaalada Cidna Aan Laga Tagayn:

Dadka leh naafooyinka koboceed waxay waajahaan caqabado waawayn markay doonayaan inay helaan hawlaha caafimaadka iyo caafimaadqabka. Marar badan, macluumaadka iyo adeegyada sare u qaada caafimaadka iyo caafimaadqabka looguma talogalin inay tixgaliyaan rabitannadooda, baahiyaha iyo naafooyinka ay qabaan.

Golaha naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu taageeri doonaa mashruuc siin doona macluumaad iyo dhaqanada ugu wanaagsan ee kusaabsan sida shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ay u kordhin karaan jimicisga una horumarin karaan caafimaadkooda iyagoo adeegsanaya madadaalo.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

10. Ma jeclaan lahayd inaad halka wax marayaan ogaado mashaariicda aagga **Carruurta iyo Caafimaadka**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan.

Qaybta 3: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Nolosha Bulshada?

11. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Warbixinta DSP La Fulinayo (DSP White Paper)**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Warbixinta DSP La Fulinayo:

Halkan Ohio, dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda waxaa saamayn ku yeesha qalalaasaha Xirfadlayda Taageerada Tooska ah (Direct Support Professional (DSP)). Waxa jira caqabado waawayn xagga helitaanka, haysashada iyo tabobaridda shaqaalaha noocan ah. Xulafada Ohio ee Xirfadlayda Taageerada Tooska ah iyo Waaxda Ohio ee Naafooyinka Koboceed waxay ka wada shaqaynayaan "Warbixin" muujin doonta xogta DSP iyo talobixinno lagu horumarinayo.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalin doonaa mashruuc dib loogu eegayo "Warbixinta" markii la dhammaystiro laguna go'aamin doono talobixinaha ugu faa'idada badan.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

12. Adigoo ka fekeraya mashruuca Koobi Garaynta iyo Ballaarinta Mashruuca Gaadiidka**, darajadee siin lahayd mashruuca?**

Guudmarka Koobi Garaynta iyo Ballaarinta Mashruuca Gaadiidka:

Dadka reer Ohio ee leh naafooyinka waxa ku adag inay helaan gaadiid amaan ah, raqiis ah, oo habboon. Taariikhdu markay ahayd 2012, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgaliyey mashruuca Athens on Demand Transit (AODT) Mashruucani wuxuu ahaa mid ku guulaystay siinta gaadiid meelaha magaalooyinka ka durugsan ee Ohio (Degmda Athens).

Si dadaaladan loo sii ballaariyo, mashruucani wuxuu:

- Fulin doonaa barnaamij tijaabo ah, isagoo isticmaalaya teknoolojiyad markii loo baahdo, taasi oo u samaxaysa AODT inay bixiso gaadiid u baxa wixii ka baxsan Degmada Athens.
- La shaqayn doonaa degmooyinka danaynaya si mashruucan oo kale uga hirgalo.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

13. Adigoo ka fekeraya mashruuca **Mashruuca SOAR Ohio & Nolosha Madaxabannaan ee Gobolka Ohio oo Dhan**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Mashruucda Ohio ee SOAR & Golaha Nolosha Madaxabannaan ee Gobolka Ohio oo Dhan:

Hannaanka dalbashada Sooshiyaal Sikiyuuritiga ee SSI/SSDI waa mid aad u adag oo caqabad badan. Tani sida badan waxay caqabad ku tahay dadka leh naafooyinka kuwaasi oo doonaya inay ka baxaan xarun oo u wareegaan bulshada. Iskaashiga Darbijiifka iyo Guryeynta Ohio (The Coalition on Homelessness and Housing) wuxuu qaatay habka SOAR* si uu uga dhigo hannaanka dalabka SSI/SSDI mid sahlan oo guulaysta. Si uu dadaalladan u sii ballaariyo, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalinayaa mashruuca Ohio SOAR si uu u siiyo tabobar iyo kaalmo farsamo 12 Xarumaha Ohio ah ee Nolosha Madaxabannaan, iyo sidoo kale adeeg bixiyayaal kale oo taageera dadka leh naafooyinka. Hadafka (yoolka) mashruucu waa tabobaridda in ka badan 300 oo bixiyayaal adeeg ah ee gobolka oo dhan si uu u horumariyo heerka guulaysiga hannaanka dalabka SSI/SSDI.

* SOAR (SSI/SSDI Outreach, Access, and Recovery)

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

14. Ma jeclaan lahayd inaad ogaado halka wax marayaan mashaariicda dhanka **Nolosha Bulshada**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan.

Qaybta 4: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Shaqaalaynta?

15. Adigoo ka fekeraya mashruuca **Fiidyawyada DB101**, darajadee siin lahayd mashruucan?

Guudmarka Fiidyawyada DB101:

Websaytka Dheefaha Naafada ee Ohio (Ohio's Disability Benefits 101 (OHDB 101)) wuxuu ka caawiyaa dadka leh naafooyinka inay go'aano ka qaataan shaqo tagista. Websaytku wuxuu leeyahay qalab Ohio ku gaar ah iyo macluumaad kusaabsan shaqaalaynta iyo qorshaynta mihnadda; doorashooyinka caymiska caafimaadka; dheefaha naafada; *hanti samaynta; waxbarashada; guryeynta; iyo nolosha bulshada. OHDB 101 waxa isticmaali kara shaqo-doonka leh naafooyinka, bixiyayaasha adeegga ama cid kasta oo bulshada ka tirsan. Websaytka waxa laga heli karaa https://oh.db101.org/.

Maalgalinta ka imanaysa Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu:

- Ka dhigayaa websaytka mid si dhib yar loo gali karo qof walbana u isticmaali karo.
- Wuxuu samaynayaa casharro fiidyaw ah OHDB 101. Mawduucyada waxa kujiri kara: Waa maxay SSI; SSI iyo Shaqada; Barnaamijka Xisaabta STABLE ee Ohio; iyo Ka Tanaasulka Medicaid.

* Hanti samaynta = ururinta shay qiime leh

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

16. Adigoo ka fekeraya mashruuca **U Kharash Garaynta Lacagta si Macquul ah (Dollars and Sense)**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka U Kharash Garaynta Lacagta si Macquul ah:

Aqoonta maaliyaddu waxay dadka u saamaxdaa inay qaataan go'aan macquul ah. Hase yeeshee, dad badan oo leh naafooyin waligood may maarayn miisaaniyad, ma furan xisaab dhigaal ama socota, ma isticmaalin Dhiirigalinta Shaqada Sooshiyaal Sikiyuuriti, ama ma dhisin hanti. Xog-ururinta Dadwaynaha ee Qorshaha Shanta Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio ayaa muujisay in fahmidda dheefaha iyo lacagtu ay ahayd caqabad dadka ka hor taagan inay ku noolaadaan nolosha ay doonayaan inay ku noolaadaan.

G oluhu wuxuu maalgalin mashruuc soosaaraya oo isticmaalaya qorshe si dadka leh naafooyinka ay u helaan aqoonta maaliyadeed iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u maareeyaan lacagtooda.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

17. Adigoo ka fekeraya mashruuca **Kaqaybgalka Loo-shaqeeyaha (Employer Engagement)**, sideed u darajayn lahayd mashruuca?

Guudmarka Kaqaybgalka Loo-shaqeeyaha:

Loo-shaqeeyayaashu ma yaqaanaan sida loo helo, loo haysto, loona horumariyo shaqaalaha leh naafooyinka ee ku sugan goobtooda shaqada. Sidoo kale, in badan oo ka mid ah adeeg bixiyayaasha ma yaqaanaan sida loola shaqeeyo shaqo-bixiyeyaasha si ay uga caawiyaan inay taageeraan shaqaalaha leh naafooyinka.

Deeqda Kaqaybgalinta Shaqo-bixiyaha waxay caawin doontaa shaqaalaha leh naafooyinka ee goobta shaqada ku sugan iyadoo:

- Baraysaa shaqo-bixiyaha, oo ay kujiraan qandaraaslayaasha fadaraalka, ku dhexjirka bulshada iyo dhaqanada ugu wanaagsan.
- Isku xirka shaqo-bixiyeyaasha iyo bixiyayaasha adeegyada naafada.
- Hagitaanka ardayda koleejka ee leh naafooyinka.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

18. Adigoo ka fekeraya mashruuca **Macluumaadka Shaqaalaynta (Employment Resources)**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Macluumaadka Shaqaalaynta:

Xog-ururinta Qorshaha Dadweynaha Shanta Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohowuxuu ogaaday laba kamid ah arrimaha ugu waawayn ee ka hor taagan dadka leh naafooyinka inay ku noolaadaan nolosha ay rabaa Arrimahani waxay ahaayeen:

- Helitaanka shaqo ama helidda shaqo dhaanta shaqada ay hayaan ama helitadda lacag badan.
- Fahmidda sida loo helo adeegyada shaqaalaynta.

Goluhu wuxuu maalgalinayaa dhawr mashruuc si uu u kordhiyo aqoonta iyo helitaanka macluumaadka, teknoolojiyadda, iyo barnaamijyadda shaqaalaynta la xiriira ee loogu talogalay shakhsiyaadka leh naafooyinka, xubnaha qoyska iyo bixiyayaasha adeegga.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

19. Ma jeclaan lahayd inaad halka wax marayaan ogaato mashaariicda dhankan **Shaqaalaynta**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan.

Qaybta 5: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Horumarinta Hoggaaminta?

20. Adigoo niyadda ka haya mashruuca **U-doodayaasha Soo Baxaya (Emerging Advocates)**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka U-doodayaasha Soo Baxaya:

Dhallinyarta leh naafooyinku waxay u baahan yahiin xirfadaha u-doodista si ay u gaaraan hadafyadooda (yoolalkooda) iyo madaxbannaani. Bilaabista barashada xirfadahan wakhti kasta ayaa la bilaabi karaa. Waxa jira dhawr barnaamijyada waxbarashada u-doodista ah oo loogu talogalay dhallinyarada leh naafooyinka ee Ohio.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalinayaa mashruuc si uu u kordhiyo una horumariyo:

- Taageerada carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed inay ka helaan qoysaska, dugsiyada, bixiyayaasha adeegyada tooska ah, iyo kuwa kale si ay u bartaan xirfadaha u-doodista iyo xirfadaha hoggaaminta.
- Fursadaha carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed ay ku isticmaalaan xirfadaha u-doodista ee qorshaynta waxbarasho iyo dhammaan go'aan-qaadashada.
- Xirfadaha u-doodista iyo hoggaaminta ee carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed si ay ugu doodaan naftooda.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

21. Adigoo niyadda ka haya mashruuca **Quwaynta Dadka leh Naafooyinka** , darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Quwaynta Dadka leh Naafooyinka:

Xeerka naafooyinka koboceed wuxuu dhigayaa in Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio uu ka shaqeeyo meelahan saddexda ah:

- Taageeridda ururrada u-doodista ee gobolka ee ay hoggaanka u hayaan shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed.
- Taageeridda hoggaamiyayaasha leh naafooyinka koboceed si ay u siiyaan tabobar hoggaamineed hoggaamiyayaasha leh naafooyinka koboceed ee mustaqbalka.
- Taageeridda iyo ballaarinta shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed si ay uga qaybqaataan hogaaminta naafooyin iyo dhaqamo kala duwan.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalinayaa dhawr mashruuc oo dabooli doona shuruudaha Xeerka DD, iyo sidoo kale inuu:

- Xoojiyo hoggaamiyayaasha iyo u-doodayaasha
- Bixiyo fursado hoggaamineed.
- Kordhiyo xirfadaha u-doodista si ay dadku codkooda sare ugu qaadaan.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

22. Ma jeclaan lahayd inaad halka wax marayaan ogaato mashaariicda dhanka **Horumarinta Hoggaaminta**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan.

Qaybta 6: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Gaarista (Outreach)?

23. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Ogaanshaha Khalkhalka Gaarka ah ee Bulshooyinka Amishka iyo Kuwa Aan Amish Ahayn** , darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Dareemidda Khalkhalka Gaarka ah ee Bulshada Amish-ka ah iyo Kuwa Aan Amish-ka Ahayn

Mashruucani waa wada shaqaynta xirfadlayda caafimaad, qoysaska, isbitaalada, iyo macallimiinta jooga meelaha Amishka ee Waqooyi-bari, Ohio. Diiradda koowaad ee mashruucu waxay saaran tahay booqashada, ogaanshaha cudurka, baaritaanka iyo daawaynta khalkhalka hidde-side ee bulshada Amishka. Mashruucani wuxuu:

- Taageeri doonaa cilmibaaris isbarbardhigaysa khalkhalada hidde-side ee dhifta ah ee bulshooyin Amishka ah oo kala duwan.
- Waxuu soosaari doonaa ilaa 30 baaritaan oo cusub, waxuuna baaritaanka la balaariyay kharashka ugu yar ku siin doonaa bulshooyinka Amishka ee Ohio.
- Waxuu balaadhin doonaa adeegyada waxbarashada iyo gaaritaanka ee ay kujiraan adeegyada la-talinta iyo taageerada hidde-side ee loogu talogalay qoysaska Amishka iyo xirfadlayda caafimaad ee iyaga u shaqeeya.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

24. Adigoo niyadda ku haya mashruuca Quwaynta **Wargayska Caawinta ee E-Diversity (Empowering Reachout E-Diversity Newsletter)**, darajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Quwaynta Warsidaha Caawinta ee E-Diversity:

Wargayska e-Diversity ee Caawintu waa mid si onlayn ah ku soo baxa labadii biloodba mar oo ay soosaaraan Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio. Wargaysku wuxuu sare u qaadaa wada shaqaynta iyo abaabulka dhaqan ahaan waxtar leh iyo isku xirka bulshooyinka aan loo adeegin ama adeeggoodu hooseeyo ee Ohio.

Qaybaha cusub ee wargayska waxa kujiri doona:

- Sanduuqa Kala-jaadnimada, Caddaaladda, iyo Isku-jirka.
- Diirad-saaridda Degmada ee dadaalada gaaritaanka.
- Maqaalo ku dhiirigalin doona inuu akhristahu fuliyo mawduucyada qaar.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

25. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Ka Ganacsiga Aadanaha iyo Bulshada Nugul**, sideed u darajayn lahayd mashruucan?

Guudmarka Ka Ganacsiga Aadanaha iyo Bulshooyinka Nugul:

Ka ganacsiga aadanuhu waa qaab xun oo gaboodfal ah, kaasi oo qofka ka qaada xorriyadda iyo sharafta. Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay aad ugu nuglaan karaan inay isticmaalaan dambiilayaasha aadanaha ka ganacsada.

Mashruucu wuxuu soosaari doonaa "Warbixin" si uu u siiyo Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio macluumaad kusaabsan dadka leh naafooyinka, oo ay kujiraan dadka aan caddaanka ahayn, ee ay isticmaalaan ama ku gaboodfalaan dadka ka ganacsada aadanuhu iyo sida Goluhu gacan uga gaysan karo joojinta habdhaqanka xun ee lidka ku ah dadka leh naafooyinka koboceed.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

26. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Bulshada LGBTQ iyo Dadka leh Naafooyinka ee Ohio**, darajadee siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Bulshada LGBTQ-ga iyo Dadka leh Naafooyinka ee Ohio

Cilmibaaris ayaa muujisay in dadka ka tirsan bulshada LGBTQ-gu ay waajahaan caqabado helidda shaqaalaynta, guryeynta, daryeelka caafimaadka iyo waxyaalo kale. Dadka LGBTQ ee leh naafooyinku sida badan waxay sheegaan inay dhibaato badan tahay in aqoonsigooda si buuxda loo garawsado. Mashruucu wuxuu eegayaa haddii dadka LGBTQ-ga ee leh naafooyinku ay helaan adeegyada iyo taageerooyinak ay baahan yahiin.

Mashruucu wuxuu soosaari "Warbixin" si uu u bixiyo:

- Macluumaadka kusaabsan caqabadaha ay waajahaan dadka leh naafooyinka, oo ay kujiraan dadka aan caddaanka ahayn, ee ka tirsan bulshada LGBTQ.
- Xog xoojin ah.
- Talobixinno loogu talogalay mashaariicda mustaqbalka.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

27. Ma jeclaan lahayd inaad halka wax marayaan ogaato mashaariicda dhanka **Gaaritaanka (Outreach)**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan.

Qaybta 7: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Wacyigalinta Dadwaynaha/ isgaarsiinta?

28. Adigoo ka fekeraya mashruuca **Wacyigalinta Dadwaynaha iyadoo la Isticmaalayo Warbaahinta Dhijitaalka ee loogu talagalay Dadka** leh Naafooyinka Koboceed, darajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Wacyigalinta Dadwaynaha iyadoo la Isticmaalayo Warbaahinta Dhijitaalka:

Deeqdan waxay siin doontaa dhammaan dadka reer Ohio macluumaad kusaabsan arrimaha dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu la kulmaan. Deeqdani waxay faafin doontaa hadal-haynta kusaabsan hawlaha mashaariicda Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio, macluumaadka kale ee kusaabsan Golaha iyo hay'adaha kale ee naafada ka hawlgala.

Deeqdu waxay isticmaali doontaa teknooloji si ay ula xiriirto dadka. Tan waxa kamid ah warbaahinta bulshada (Facebook, Twitter, iwm.), websaytka Golaha, Emeyl, fiidyawyo, podcast-yo iyo waxyaalo kale. Tan waxa loo isticmaali doonaa ololayaasha kusaabsan arrimo gaar ah, gaarista dadka la hagraday ee Ohio iyo helidda dadka jeclaan lahaa inay xubin ka noqdaan Golaha.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

29. Ma jeclaan lahayd inaad halka wax marayaan ogaato mashaariicda dhanka **Wacyigalinta/Isgaarsiinta Dadwaynaha**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan

Qaybta 8: Maxaad ka aaminsan tahay Qorshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee kusaabsan Naafooyinka koboceed ee ku aaddan Siyaasadda Dawladda?

30. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Maalinta Wacyigalinta & U-doodista Naafooyinka Koboceed**, darajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Maalinta Wacyigalinta Naafooyinka Koboceed & U-doodista:

Dadka leh naafooyinka iyo xubnaha qoysaskoodu iyagaa ah u-doodayaasha naftooda markay timaaddo gaarsiinta warkooda ee dadka caadiga ah iyo siyaasad-dejiyayaasha. Horumarka laga gaaray siyaasadda dawladda waxa keena u-doodista ay sameeyaan shakhsiyaadka leh naafooyinku.

Deeq-halaha Maalinta Wacyigalinta iyo U-doodista Naafooyinka Koboceed waxa uu qorshaynayaa oo uu martigalinayaa maalin loogu talogalay dadka leh naafooyinka iyo xubnaha qoysaska iyo dad kale taasi oo ka qabsoomi doonta Dhismaha Maamulka Gobolka ee Ohio. Dadka aan munaasabadda iman karin waxay kala socon doonaan internetka. Dadka meesha ka hadlaya waxa lagu casuumi doonaa inay ka hadlaan arrimaha kala duwan ee naafada haysta. Qof kasta oo yimaadda Dhismaha Maamulka Gooblka oo doonaya inuu la hadlo sharci-dejiyihiisa kulan ayaa looga qaban doonaa.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

31. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Iskaashiga U-doodista Sharci-dajinta Federaalka (Federal Legislative Advocacy Partnership (FLAP))**, darajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Iskaashiga U-doodista Sharci-dajinta Federaalka (FLAP):

Xubnaha Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio iyo wakiilo kale oo ka socda Ohio ayaa qaadan doona tabobar iyo taageero si ay uga qaybgalaan u-doodista ku aaddan dawladda fadaraalka. Waxay kaqaybqaadan doonaan dood hal maalin ah oo kusaabsan arrimaha siyaasadda fadaraalka ee wakhtigan.

Deeqdu waxay waqti u samaynaysaa kulamo waxayna soosaaraysaa qodobo laga hadlo oo loogu talogalay dadka leh naafooyinka iyo xubnaha qoysaska si ay ula hadlaan kongareeska.

Deeqdu waxay qorshayn doontaa munaasibad Dayrta ah sanad kasta oo ayna jirin doorasho fadaraalka ah.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

32. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Kulamada Xog-waraysiga Kulanka Guud (General Assembly Briefing Sessions)**, darajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Kulamada Xog-waraysiga Kulanka Guud:

Waa adag tahay in la fahmo nidaamka adeegyada iyo taageerooyinka Ohio. Waa wax ku adag u-doodayaasha leh naafooyinka, xubnaha qoysaska iyo xirfadlayda inay ka hadlaan dhibaatooyinka iyo baahiyaha. Tani sida badan waxay dhacdaa marka laga qaybgalinayo siyaasad-dejiyayaasha iyo shaqaalaha kuwaasi oo aan aqoon u lahayn taariikhda iyo arrimaha dadka leh naafooyinka koboceed ay waajahaan.

Deeqdani waxay yeelan doontaa afar tabobar sanad walba, si ay uga caawiso sharci-dejiyayaasha iyo shaqaalaha inay fahmaan sida dadka leh naafooyinku u helaan adeeygada iyo sida barnaamijyadu u shaqeeyaan. Qof leh naafo ama xubin qoyska ah ayaa sheekadooda ka sheekayn doonta tabobar kasta.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

33. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Deeqaha Cilmibaarista Siyaasadda Dawladda**, darajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Deeqaha Cilmibaarista Siyaasadda Dawladda (Public Policy Research Grants):

Deeqaha Cilmibaarista Siyaasadda Dawladda waxay daraasayn doonaan arrimaha naafada, waxayna warbixin ka qorayaan waxa laga bartay arrin kasta. Mawduuca daraasad kasta waxa go'aamin doona Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio. Cilmibaaristu waxay sare u qaadaysaa isbaddalka si ay u horumariso adeegyada iyo taageerooyinka loogu talogalay dadka leh naafooyinka iyo qoysaskooda. Deeqdan ma qabsoomi doonto sanad kasta.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

35. Adigoo niyadda ku haya mashruuca **Qiimaha Barashada Xirfadaha/Sharci-dejinta Iyadoo La Shaqaalaynayo Dadka Leh Naafada (PWD- Vocational Apprenticeship/Legislature Utilizing Employment of People with Disabilities)**, daarajadee ayaad siin lahayd mashruuca?

Guudmarka Qiimaha PWD:

Fursadaha Barnaamijka Barashada Xirfadaha ee Dadka leh Naafooyinka ee reer Ohio wuxuu shaqaalayn iyo tabobar dadka naafooyinka leh uga raadinayaa laanta fulinta ee dawladda. Diiradda barnaamijku wuxuu ku ekaa ka shaqaalaynta hay'adaha golayaasha.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu doonayaa inuu ku ballaariyo barnaamijka oo uu ku daro fursadaha shaqaalaynta iyo tabobarka shaqada ee Sharci-dejinta Ohio. Deeqdu waxay heli doontaa dad leh naafooyin kuwaasi oo leh xirfadaha ama qaadan kara tabobar xirfadaha ah, kaasi oo u saamaxaya inay ka shaqeeyaan sharci-dejinta dhexdeeda. Deeqdu sidoo kale waxay la shaqaynaysaa sharci-dejinta iyo hay'adaha sharci-dejineed si ay u ogaato halka dadka leh naafooyinku ay awoodi karaan inay ka shaqeeyaan.

__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u faa'idayn doono dadka leh naafooyinka iyo/ama qoysaskooda.
__ Waxaan u malaynayaa in mashruucu u baahan yahay horumarin.
__ Ma garanayo.
__ Ma rabo inaan jawaabcelin ka bixiyo mashruucan.

Waxaan hayaa faallooyinka ama talobixinno soo socda:

36. Ma jeclaan lahayd inaad halka wax marayaan ogaato mashaariicda dhanka **Siyaasadda Dawladda**?

__ Haa, waan jeclaan lahaa inaan ogaado halka wax marayaan.
__ Maya, ma jeclaan lahayn inaan ogaado halka wax marayaan.

37. Ma haysaa wax faallooyin ah oo kale oo aad jeclaan lahayd inaad la wadaagto Golaha DD oo kusaabsan Qoshaha Gobolka ee 5 Sano ee Golaha DD?

__ Wax faallooyin ah ma hayo.

Faallooyinka soo socda ayaan hayaa:

Waad ku mahadsan tahay buuxinta Xog-ururinta Aragtida Dadwaynaha ee Qorshaha Gobolka 5 Sano. Fadlan ogow inaad la wadaagi karto xogururintan qoyskaaga, saaxiibada iyo dadka aad wada shaqaysaan kuwaasi oo danaynaya Nidaamka DD ee Ohio. Xog-ururintan waxa onlayn laga heli karaa: http://ddc.ohio.gov

Waxaanu codsanaynaa in qof kasta xog-ururinta halmar buuxiyo. Hase yeeshee, haddii ay jirto xubin qoyskaaga ah ama cid kale oo u baahan caawimo buuxinta xog-ururintan, fadlan ogow inaad xog-ururintiisa u buuxin karto adigoo aragtidiisa isticmaalaya.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida xubin looga noqdo goblaha, booqo websaytkahttp://ddc.ohio.gov ama wac taleefanka (800)766-7426.

Xog-ururinaha la buuxiyey waxaa ugu danbayn la diri karaa**Febraayo 28, 2021**, iyadoo lagu dirayo:

Ohio DD Council
899 East Broad Street, Suite 203
Columbus, OH 43205

Ama Emeyl ahaan:
leslie.connelly@dodd.ohio.gov

Ama Faakis ahaan:
614-466-0298